ILAALINTA WAX KA BEDDELKA XUQUUQDA ARDAYDA OGEYSIISKA SANADLAHA AH EE XUQUUQDA EE 2019-20

Wax ka bedelka Badbaadinta Xuquuqda Ardayga (PPRA) waa sharci federaal ah kaasoo awood u siinaya waalidiinta/ardeyda wax ka barata dugsiga hoose iyo sare xuquuq dhowr ah oo ku saabsan aruurinta macluumaadka sahaminta, suuq geynta, iyo baaritaanada jirka qaarkood. Golaha Dugsiga Seattle wuxuu qaatay Xeerka Bogga 32 ee faahfaahinta xuquuqaha iyo waajibaadka PPRA. Kuwaas waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, xuquuqda ay u leeyihiin:

- *Oggolaanshaha ka hor ardayda waxaa laga codsanayaa inay u soo gudbiyaan sahanka la xiriira mid ama in ka badan aagagga soo socda ee la ilaaliyo ("xogururinta la ilaaliyo") haddii sahanka la maalgeliyo gabi ahaan ama qayb ahaan barnaamijka Waaxda Waxbarashada Mareykanka (ED). –*
    1. Ku xirnaashaha siyaasadeed ama aaminsanaanta ardayga ama waalidka ardayga ;
    2. Dhibaatooyinka maskaxda ama jirka ee ardayga ama qoyska ardayga;
    3. Akhlaaqda galmada ama dabeecadaha;
    4. Sharci darro ah, bulshada ka soo horjeedda, is-qarin, ama dhaqan xumo;
    5. Qiimaynta dadka kale ee jawaab bixiyayaashu la leeyihiin xiriir qoys oo dhaw;
    6. Sharci ahaan loo aqoonsaday cilaaqaad mudnaan leh, sida qareeno, dhakhaatiir, ama wasiirro;
    7. Dhaqanka diinta, ku xirnaanshada, ama rumeynta ardayga ama waalidka ardayga; ama
    8. Dakhliga, oo aan ahayn sida sharcigu farayo si loo go'aamiyo u-qalmitaanka barnaamijka.

- *Hesho ogeysiis iyo fursad aad ardayga kaga doorato –*
    1. Sahan xog kastoo kale oo la ilaaliyo, iyadoo aan loo eegin maalgalinta;
    2. Wixii aan ahayn xaalad deg-deg ah, imtixaan jireed ama baaritaanka looga baahan yahay xaalad xaadiritaanka, oo ay maamusho dugsiga ama wakiilkiisa, oo aan loo baahnayn in la ilaaliyo caafimaadka degdega iyo badbaadada ardayga, marka laga reebo maqalka, aragga, ama baaritaanka, ama wixii baadhitaan jidheed ama baaritaan ah ee la oggol yahay ama looga baahan yahay sharciga Gobolka; iyo
    3. Hawlaha ku lug leh ururinta, shaacinta, ama adeegsiga macluumaadka shakhsi ahaaneed ee laga soo aruuriyay ardayda suuqgeynta ama looga iibiyo ama haddii kale loo qaybiyo macluumaadka kuwa kale. (Tani ma quseyso aruurinta, shaacinta, ama adeegsiga macluumaadka shakhsi ahaaneed ee laga soo aruuriyay ardayda ujeeddada gaarka ah ee horumarinta, qiimeynta, ama bixinta alaabada waxbarashada ama adeegyada loogu talagalay ardayda ama xarumaha waxbarashada.)

- *Kormeerida, codsiga iyo maamul ka hor ama isticmaalka*
    1. Sahaminta macluumaadka la ilaaliyo ee ardayda iyo sahaminta ay sameeyeen koox saddexaad;
    2. Qalabka loo adeegsado aruurinta macluumaadka shaqsiyadeed ee ardayda wax ka mid ah suuqgeynta kor ku xusan, iibinta, ama ujeeddooyinka kale ee qaybinta; iyo
    3. Qalabka waxbarista ee loo isticmaalo qayb ka mid ah manhajka waxbarashada.

Xuquuqdani waxay ku wareejineysaa waalidiinta/mas'uuliyiinta loo gudbiyo arday 18 sano jira ama ilmo yar xornimo ka hooseeya sharciga Gobolka.

Waaliddiinta / mas'uuliyiinta aaminsan in xuquuqdooda lagu xadgudbay waxay cabasho u gudbin karaan:
Xafiiska U hogaansanaanta Siyaasadda Qoyska, Waaxda Waxbarashada Mareykanka, 400 Maryland Avenue SW, Washington, D.C. 20202

Dadaallada xog aruurinta ee la saadaaliyay ayaa hoos ku taxan.
SAHANADA AY MAALGELISO WAAXDA WAXBARASHADA (ogolaanshaha furan):
Ma jiraan sahanno maalgelin ay bixiso ED oo baaraya aagagga la ilaaliyo ee la filayo sannad dugsiyeedka 2019-20.

SAHANADA KALE (xaq u leedahay inaad ka baxdo):

- Hubi Nafsaddaada - Baadhitaanno ay taageerto King County oo bixiya jawaab-celin shakhsi ahaaneed oo dhakhso leh oo ku saabsan dabeecadaha caafimaad. Su'aalaha waxaa la weydiiyaa awoodaha, taageerooyinka, yoolalka, isticmaalka maandooriyaha, caafimaadka dhimirka, dhaawacyada, iyo badbaadada. Waxaa la siiyaa dhammaan ardayda fasalka 7aad deyrta/jiilaalka iyo ardayda la soo xushay inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.
- Daraasadda Dabeecadda Khatarta Dhalinyarada - Sahankaan qaran waxaa taageera Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada (CDC) waxaana loo maamulaa sanad dugsiyeed kasta. Su'aalaha sahanka waxay ardayda dugsiga sare wax ka weydiiya hab-dhaqannada ay ka mid yihiin caafimaadka dhimirka, amniga, dhaqanka galmada, isticmaalka maandooriyaha, dhaqdhaqaaqa jirka, iyo nafaqada. Sahankan wuxuu ka dhici doonaa sanad dugsiyeedka 2020-21.
- Sahaminta Ardayga ee Cimilada Dugsiga- sahaminta degmada ee sanadlaha ah ee ardayda wax laga weeydiyo jawiga iskuulka iyo dhaqanka, iyo sidoo kale tayada tilmaanta. Kani ma'ahan xogururinta macluumaadka la ilaaliyo: wax su'aalo ah lagama weydiin

doono meelaha kor lagu soo xusay. Dhammaan jawaabaha waa qarsoodi. Waxaa la siiyaa guga dhammaan ardayda fasalka 3aad-12aad.

• Su'aalaha Awooda iyo Dhibaatooyinka - SDQ waa su aalo kooban oo bulsho iyo shucuureed oo kalkaaliyeyaasha dugsigu ay u adeegsadaan aalad kor loogu qaadayo guusha waxbarashada iyo yareynta caqabadaha waxbarashada. Su'aalaha waxaa la weydiiyaa arrimaha maskaxda/dareenka iyo sidoo kale anshax darrada. SDQ waxaa la siin doonaa deyrta/jiilaalka ardayda fasallada 6aad iyo 9aad ee dhigata dugsiyada ay taageerto FEPP.